



Australian Government



jobactive

jobactive — waxaan kaa caawimaynaa inaad shaqo hesho

jobactive waa habka Australia ugu hesho dad badan oo Australian ah shaqo. Wuxuu ku xiraa kuwa shaqada raadinayaa shaqa-bixiyayaasha waxaana bixiya shabakadaha bixiya jobactive shaqa-doonka oo ka badan 1700 goobood kuna yaalla Australia.

Qof shaqo doonaya ahaan, bixiyahaaga jobactive wuxuu kaa caawin karaa:

- Qorista sooyaalka shaqada iyo tacliinta
- Raadinta shaqada
- Diyaarinta waraysiga shaqada
- Helida xirfadaha shaqabixiyayaalka maxaliga ah
- Helida iyo hanashada shaqada.

Xaq ma u leeyahay jobactive?

Adeegyada jobactive waxaa badanaa la hellaa haddii aad qaadato lacagta dakhliga kaalmada, sida Newstart Allowance, Youth Allowance (kuwa kale), ama Parenting Payment, kuwaas oo leh shuruuda waajibaad oo labada dhinac ah. Waajibaadyada labada dhinac ahi waa kuwa aad u baahan tahay si aad lacag ku hesho, sida shaqa raadinta.

Department of Human Services ee Xukuumada Australia ayaa qiimayn doonta xaalladaada xaq u yeelashada jobactive iyo in lagu xawilo bixiyaha jobactive.

Haddii aadan qaadan kaalmada dakhliga, ama aad qaadanayso kaalmada dakhliga oo aadan lahayn waajibaadyo laba dhinac ah, waxaa laga yaabaa inaad tabaruc ku bixiso adeegyada jobactive shaqa-doonka haddii:

- Aadan shaqaynayn ama aadan si buuxda wax u baranayn, iyo
- aad leedahay xuquuqda aad kaga shaqayn karto Australia.

Caawimadee heli karaa?

Bixiyayaasha jobactive waxay leeyihiin furfurnaanta inay la xiriiryaan adeegyadooda baahidaada si ay kaaga caawimaan inaad hesho shaqo una xejisato.

Bixiyahaaga jobactive ayaa kula kulmi doona si uu kaaga caawimo inaad shaqo hesho wuxuuna samaynayaa Job Plan waxaana ka mid noqon kara:

- Xarakaadyada kaa caawima inaad hesho xirfadaha shaqa-bixiyayaalka maxaliga rabaan
- inay kaa caawimaan sidii aad ku guulaysan lahayd ama aad ku maarayn lahayd xaalladaha aan xirfada u baahnayn hadday khusayso
- inaad raadiso ugu yaraan 20 shaqo bil walba – bixiyahaaga jobactive ayaa la xiriirin kara lambarka shaqo xaalkaaga iyo xaallada shaqaale ee suuqa
- Work for the Dole ama lacagta cayrta ama xarakaad kale kale oo la ansixiyey (sida shaqo waqti dhiman ah ama waxbarasho waqti dhiman ah, koorso aad xaq u leedahay, ka qaybgelida luqada la ansixiyey, tababarka farbarashada, tira-barashada ama shaqo tabaruc ah lix bilood sannad kasta.

Si lagaaga caawimo inaad shaqo hesho, bixiyaha jobactive wuxuu heli karaa kharajgarayn si loo bixiyo waxyaallaha shaqada la xiriira, adeegyada mihnadeed, tababarada lugta ku leh iyo kaalmada ka dib markaad shaqada bilawdo.

Waxaan doonayaa macluumaad intaas ka badan

Gal www.employment.gov.au/jobactive Wac Khadka Macluumaadka Adeegyada Shaqada oo ah **13 62 68*** ama la hadal bixiyaha shaqada haddii aad horayba u isaga diiwaangelisay barnaamijka shaqa-doonka jobactive ama Disability Employment Services (Adeegyada Shaqada Dadka linta leh)

Raadi bixiyaha jobactive agtaada ah www.jobactive.gov.au.

Maxaan sameeyaa haddii aan wax ku saluugsan ahay jawiga shaqadeyda?

Ururkaaga martisooraha ah ee Work for the Dole waa inuu kuu sheegaa sidii aad warbixin uga soo sheegi lahayd arimaha ammaanka iyo caafimaadka shaqo iyo wixii kale ee aad saluugto. Haddii aadan ku faraxsaneyn sida ururka martisooraha ahi uu wax uga qabanayo waxaad saluugsan tahay, la xiriir bixiyaha jobactive.

Bixiyahaaga shaqadu wuxuu kaloo kugu xiri karaa da'daalo kale oo dawladeed. Kuwaas waxaa ka mid ah caawimada meel u guurista, kabida mushaharka, tababarka, xirfad cusub u samaynta iyo bilaabida ganacsiga ay bixiso (New Enterprise Incentive Scheme (NEIS))

Maxaad sahay helli kartaa?

Si lagaaga caawimo inaad shaqo hesho, bixiyahaaga jobactive shaqa-doonka ayaa kaa siin doona xafiisyadooda kumbuyuutar, internet, iyo aalladaha wax lagu daabaco. Waxaad isticmaali kartaa aalladahaan si aad u raadiso ama u dalbato shaqooyin, aad cusboonaysiiso oo daabacato sooyaalka waxbarasho iyo shaqo.

Waxaad kaloo shaqooyin ka raadin kartaa adeegyada online-ka ah websaytka jobactive oo ah www.jobactive.gov.au ama app-ka free Job Seeker JobSearch app (oo laga hella iTunes iyo Google Play).

Adoo akoontigaaga myGov kaga xirmaya akoontigaaga JobSearch, waxaad dabagal ku samayn kartaa dalabyadaada shaqada, waxaad maarayn kartaa ballantaada, waxaad helli kartaa wargelin waxaadna maarayn kartaa sooyaalkaaga shaqada, dhammaan sooyaaladaada shakhsiyeed.

Career Quiz App ayaa isaguna kaa caawin kara inaad hesho noocyada shaqo oo kugu haboon, iyo weliba macluumaadyada laga yaabo inay kugu haboon yihiin

sida inta dad ka shaqaysa goob shaqo oo mucayina iyo waxay qaataan. Waxaad kaloo la kala soo bixi kartaa Career Quiz app-kaaga ama waxaad gelayaa www.joboutlook.gov.au/careerquiz.

Maxaa layga filanayaa?

Haddii aad qaadato lacagta kaalmaynta dakhliga aadna heshiis aad gashay, waxaad u baahan tahay inaad gasho Job Plan aadna samayso dhamaan xarakaadyada hoos ku qoran sida buuxinta:

- Tirada shaqo oo loo baahan yahay inaad raadiso bishiiba, iyo
- Work for the Dole, ama xarakaadyo kale oo la ansixiyey, lix bilood sanad walba.

Waxaad kaloo u baahan tahay inaad wax ka qabato wixii uu kuu soo gudbiyo bixiyahaaga shaqooyinka mucayinka ah ee ka meeshaad ku nooshahay.

Bixiyahaaga jobactive shaqa-doonka ayaa sharxi doona kaalana shaqayn doona si uu kaaga caawimo waajibaadkaaga labada dhinac ah ee shaqo.

Wixii laga filanayo shaqo-bixinta

Xukuumada Australia waxay filanaysaa bixiyayaasha jobactive shaqa-doonku inay siiyaan kuwa shaqada doonaya iyo kuwa shaqada bixiya adeeg tayo leh.

Service Guarantees (Ballanqaadka Adeega) oo sheegaya shuruudaha adeeg bixiyaha waxaa laga helli karaa www.employment.gov.au.

Bixiyayaasha jobactive waxaa looga baahan yahay inay muujiyaan Ballanqaadyada Adeega iyo qorshahooda ku bixinta adeega xafiisyadooda iyo inay helli karaan kuwa shaqada raadiya iyo kuwa bixiya. Qorshahooda waxaa kaloo lagu daabacaa www.jobsearch.gov.au.

Ma u baahan tahay in lagaa caawimo qoraalkaan?

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan la xiriir Adeega Afcelinta iyo tarjumaada Qoraalka (TIS) tel: **131 450*** weydiina **13 62 68***.

Haddii aad dhega la'dahay, ama aad qabto dhibaato maqal ama hadal, waxaad isticmaali kartaa National Relay Service. Macluumaad intaas ka badan, booqo www.relayservice.com.au*

*ogsoonow in lacag la iska rabo dhamaan lambarada ka kaca '13' ee telefoonada moobaylka.